Education & Communities
NSW GOVERNMENT
Public Schools NSW

**HEAD LICE TREATMENT OPTIONS**
INFORMATION FOR PARENTS AND CARERS
SOMALI

# MACLUUMAADKA FURSADAHA DAAWEYNTA INJIRTA MADAXA

## EE LOOGU TALAGALAY XANNAANEEYAYAASHA IYO WAALIDIINTA

## Waxaa jira laba fursadood oo daaweyneed oo loogu talagalay injirta madaxa.

1. Ku saarida gacanta (ku saarida injirta madaxa shanlo)
2. Kiimiko ku saarida

### Farsamo ku saarida

Farsamo ku saaridu waxay ku lug leedahay ku shubida shaambada caadiga ah ee timaha iyagoo timuhu qalalan yihiin. Ka dib markaad ku daboosho timaha shaambada ku kala bixi shanlada caadiga adoo isticmaalaya timahana u kala qaybi qaybo. Shaambadu ma dilayso injirta laakiinse waxay suuxisaa ilaa 20 daqiiqo oo ay sahashaa in la saaro. Shanlada injirta ayaa saari doonta qandhicilka (ukunta) iyo injirta suuxsan. Ku masax shanlada tishuga cad oo ka jeegaree wax ukun ah ama injir. Sii wad shanlaynta ilaa aysan wax kale ka muuqan tishuga. Habkaan waa in la isticmaalaa maalin dhaaf ilaa aysan waxba hadhin (badanaa qiyaastii 7 ilaa 10 maalmood).

Habkaan waa habka la doorbidaayo in lagu daaweeyo injirta madaxa sababtoo ah waa wax ku ool, waxba kama geysato u adkeysashada cayayaanka ku jira injirta madaxa iyo sidoo kale khatarteeda xasaasiyada madaxu waa hooseysaa.

Habkaan farsamo ku saarida sidoo kale wuxuu maareeyaa injirta madaxa ka hor intaysan madaxa ku sameysmin. Markaad qubeysanayso waa inaad heysataa shanlada madaxa oo wanaagsan wakhti kasta oo qooyskiinu dhaqo shanlada timahooda iyagoo isticmaalaya shanlada injirta. Tani waxay hubineysaa in injirta la qabto ka hor intaysan dhalin ukumo fara badan.

Haddii carruurtaadu ay waaweyn yihiin si ay u dhaqaan timahooda ku dhiirigeli iyaga inay isticmaalaan shanlada nafsad ahaantooda. Ama shanladu diyaar ha ahaato meeshii aad ku mayrayso timaha carruurta oo isticmaal mar kasta oo aad timahooda dhaqeyso.

### Kiimiko ku saarida

Haddii aad doorato inaad isticmaasho kiimiko ku daaweynta, xasuuso inaad u raacdo tilmaamaha si taxadar leh. Yeysan ku jiidan inaad isla daaweyntaas kiimikada mar labaad mariso haddii aysan u muuqaan inaysan shaqeynaynin. Ku bedel daaweyn kale oo isticmaasha iskudar daaweyn ka duwan ama isticmaal habka shanlada iyo shaambooga. Waa inaad ku celisaa daaweynta 7 maalmood gudahood si loo dilo ukun kasta oo dhowaan dilaacday. Waxaad sidoo kale u baahan doontaa inaad isticmaasho shanlada injirta si aad u hubiso inay daaweyntu shaqeynayso. Haddii aad hesho injir dhimatay daawadu waa shaqeysay. Haddii aad hesho injir nool, daaweyntu ma shaqeyn.

Marka ilmahaagu uusan lahayn qandhicil iyo injir, xasuuso inaad si joogto ah uga jeegareyso adoo isticmaalaya shaambada iyo shanlada ilkaha yar yar ee injirta. Hore u ogaanshaha iyo daaweynta ayaa ka hortegaya inay dib ugu dhalato ardeyda fasalkaaga iyo xubnaha qoyskaba.

### Waxaad ka sameyn lahayd dharka iyo sariiraha

Cilmi baaris ayaa soo jeedineysa in dharka sariirta, koofiyadaha, dharka iyo alaabta guriga ayna martigelinayn injirta ama gudbinayn injirta ama ukunta wax faa'iido ahina kuma jirto in la dhaqo. Injirta iyo ukunta kaliya ayaa ku nool madaxa bani'aadamka. Si dhakhso ah ayey biyaha ugu dhammaadaan oo ay u dhintaan haddii madaxa laga saaro.

Macluumaadkan wuxuu ku saleysan yahay macluumaad lagu bixiyey website ka Nitbusters Caafimaadka NSW.